

## Oaababka kale ee isgaarsiinta aan hadalka ahayn.

Ka sokoow isticmaalidda ereyo, waxaan ku dheerrigalin karnaa caruurta qaabab kale eey ku gudbini karaan dareenkooda. Qaababkani kale ma beddelayaan hadalka ereyada ka kooban. Laakiin way dhameystirayaan hadalka, isla markaana u sahlayaan caruurta iney gudbiyaan dareenkooda iyagoo adeegsanaya aqoontooda jirta markaasi.

Qaababkani kale ee isgaarsiin ee aan ahayn hadalka waxaa ka mid ah:

- i. <u>Sawirro</u>: Canuga wuxuu adeegsanayaa sawirro si uu gudbiyo dareenkiisa. Sawirrada waxay u dhaxeyn karaan kuwo dhab ah ilaa sawir gacmeed. Sawir kasto waa inuu lahaadaa faahfaahin qoraal ah. Sawirrada waa iney ahaadaan kuwo leh habraac isku mid ah meel kasto(sida xarunta xannaanda caruurta iyo gurigaba).
- ii. <u>Tilmaan Afeed</u>: Canuga waxuu adeegsani karaa tilmaan afeedka caalamiga ah oo adduunka oo dhan isku si u yaqaan, kaasoo canuga uu dhaqdhaqaajinayo gacantiisa si uu u muujiyo waxa uu doonayo inuu dhaho ama uu sheego.
- iii. <u>Iswaafajinta waxyaabaha iyo dareenka</u>: Canuga wuxuu adeegsanayaa waxyaabo jira si uu u gudbiya dareenkiisa ( sida: canuga oo fiirinaya sheyga ama waxa,taabanaya si uu muujiyo baahidiisa, waxa uu rabo ama aay rabto.)

M.T.A.C.L: Hawlaha Caruurta intey yaryihiin.